



## **Buugga Siyaasadda iyo Nidaamka Booliska ee Waaxda Booliiska Minneapolis**

Number:  
7-1000

### **Mujalladda 7aad – Hawlgallada goobta**

### **Dadka Naafada ah oo Aqoonta Luqaddooda Ingiriisiga ay Xaddidantahay**

#### **7-1002 La Xiriirida Dhegoolaha ama Shakhsiyaadka Maqalka Adag**

(02/08/96) (12/05/08) (05/06/15)

(A)

Waa sharcigaan ama xeerka Waaxda Booliiska Minneapolis in turjubaanada Luuqadda Dhegoolayaasha ee Maraykanka (American Sign Language) loo diyaariyey shakhsiyaadka degoolayaasha ah ama maqalka culus ee dalbaday turjubaanada. Marka la ogaado in qofku uu noqon karo dhegoole ama mid maqal adag, shaqaalaha MPD waa in ay ku wargeliyaan qofka in turjubaanada luuqadda dhegoolaha iyo kuwa maqalka adag ay diyaar yihiin lacag la'aan iyo in ay qaadan karto ilaa hal saac in turjubaan yimaado. Shaqaaluhu waa inay sidoo kale weydiiyaan qofka dhegaha la' ama qofka maqalka adag nooca turjubaanka ama caawimada uu isaga/iyada u baahan yahay inay ku sameeyaan xiriirkooda/wadahadalkooda.

Haddii qof dhego la' ama qof maqal adag uu soo jeediyo hab wadaag is-gaarsiineed, shaqaalaha MPD waa inay isku dayaan inay aqbalaan talada. Shaqaaluhu uma baahna in qofka dhegoolaha ah ama qofka maqalka adag saaxiibkiis ama xubnaha qoyska inay u turjumaan isaga/ama iyada.

Haddii la go'aamiyo in loo baahan yahay turjubaan, shaqaaluhu waa inay tixraacaan Hagaha LEP-da ee ku yaal MPD Net ee hoos yimaada Buug-gacmeedyada iyo Hagayaasha/Tilmaamaha adeeg bixiyayaasha magaalada ee qandaraaska haysta si ay u codsadaan adeegga turjubaanka. Haddii aan loo baahnayn tallaabo booliis oo degdeg ah, shaqaaluhu waxay soo jeedin karaan inay ballan waraysi qabtaan ama ballan si ay ugu daraan turjubaan, taas oo ah taariikh iyo wakhti dambe oo labada dhinacba la isku raaci karo.

Kahor inta uusan turjubaan imaan, shaqaaluhu waa in aysan qaadan warbixinta tuhmanaha, aysan siinin digniinaha loo yaqaan Miranda ama aysan la yeelan wadahadal kale oo loo isticmaali karo maxkamada sharciga. Inta lagu jiro duruufaha adag, turjubaan ayaa la soo bandhigi doonaa ka dib marka ay dhammaato xaaladdu.

Saraakiisha loo xilsaaray ka jawaabidda 911 ee wata baabuurta gurmada waxay leeyihiin go'aan si ay u go'aamiyaan in ay la joogaan qofka dhegaha la' ama qofka maqalka adag inta ay sugayaan turjumaan inuu yimaado. Haddii aysan jirin khatar degdeg ah oo qofku uu codsaday turjubaan, saraakiishu waa inay ku amraan inay tagaan xarunta saldhigga booliska ee agagaarka ugu dhow halkaas oo wareysigu ka dhici doono marka uu yimaado turjubaanku. Saraakiishu waa inay ku soo laabtaan goobta saldhigga booliska marka ay wada joogaan qofka dhegoolka ah ama qofka maqalka adag iyo turjubaankuba.

Marka ay la kulmaan qof dhego la' ama dhego adag, saraakiishu waa in ay ku qoraan dhega la'aanta qofka warbixinta CAPRS-ka. Tallaabo kasta oo la qaado si loo waafajiyo talooyinka la soo jeediyay si loo fududeeyo wada xiriirka waa in sidoo kale la qoro/xuso. Haddii turjubaan la codsaday, warbixinta CAPRS-ka waa in lagu daraa wakhtiga turjubaanka la codsaday iyo

wakhtiga turjubaanka bilaabay turjumaada. Intaa waxaa dheer, arrimaha ama dhibaatooyinka ka dhasha isku dayga lagu bixinayo helitaanka turjubaan aqoon leh waa in lagu diiwaan geliyo warbixinta CAPRS-ka, haddii la samaynkaro, iyo in Isuduwaha LEP-ga lagu ogeysiiyaa taleefoon (673-2338), xusuus-qor, ama iimayl.

Shaqaalaha MPD-da waa inay ku aadiyaan si toos ah su'aalaha iyo welwelka ku saabsan la xiriirka dadka dhegaha la' ama kuwa maqalka adag Isuduwaha LEP-ga.

### **Hagayaasha Xiriirka**

Guud ahaan, marka lala xiriirinayo dadka dhegaha la' ama kuwa maqalka adag marka uu maqan yahay turjubaan, shaqaaluhu waa inay ka warqabaan kuwan soo socda:

- Ku jeenso qofka; kasbo dhugtiisa/dareenkiisa/keeda. U jeenso iftiinka.
- Si toos ah ula xiriir dhegoolaha ama qofka maqalka adag; joogtee isha ku haytaada.
- Isticmaal dhaqdhaqaaqyo iyo tibaaxaha weji-kahadalka. Ha xaddidin isticmaalka labada gacmood (haddii aan loo baahnayn ammaanka sarkaalka dartiis mooyee).
- Qofka sii qalin iyo warqad, amaba haddii la heli karo, isticmaal kombuyuutar. (02/08/96) (12/05/08)
- Isgaarsiinta qoran waxay u baahan kartaa dadaal dheeraad ah si loo fahmo. Luuqadda Calaamadaha Dhegoolayaasha Ameerikaanka waa luuqad leh qaab-dhismeedka jumlada iyo adeegsiga kelmado ka duwan afka Ingiriisiga. (02/08/96) (12/05/08)